

Waa Maxay SAC?

SAC ama Ujrada Jiritaanka Bulaacad (Sewer Availability Charge) waa jurad mar-keliya ah ee Metropolitan Council Environmental Services (MCES) ka qaadaan dawladda hoose si ay u isticmaalaan mugga ku-talogalka ah ee Habka Qashinka Magaalo-weynta.

Dawladda hoose waxa laga yaabaa in ay sidoo kale qaadaan, oo korsaar ku ah ujrada MCES, ujrada maxali SAC ama ujrada dheeraad ah ee mugga habka bulaacadda maxaliga ah.

Muxuu SAC Bixiyaa?

SAC waxay bixisaa lacag ama bixitaano dayn ah ee bixinta mugga idaamka Qashinka Magaalo-weynta. Lacagta hadha ama bixitaanada daynta waxa bixiya isticmaalayaasa habka oo u mara Ujrada Biyaha La-isticmaalo Dawladda Hoose.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee habka abaalka-helay, booqo www.metrocouncil.org/Wastewater-Water.aspx.

Maxay tahay sababta aan SAC u bixinayo?

Barnaamijka SAC, oo jiray illaa 1973, wuxu gargaaraa bixinta habka mugga iyo ballaarinta.

Marka degganayaasha iyo dadka leh ganacsiyada ayaa siiya dawladda hoose SAC, waxay bixiyaan qaybtooda muggan. Waa kharash adeeg u diyaar ahaanta helista biyaha la isticmaalay.

Haddii Aan Awoodi Waayo SAC?

MCES waxay yaqiinsantahay shaqaalaha inuu kadeed ku hayo badi dadka iy ganacsiyada. Caadiyan SAC iyo ujrada kale ee dawladda hoose waa kharashyo uqalma daynta ganacsiyada yaryar.

Ka hubi baankaaga ama wakii amaahood.

Waa Maxay Go'aanka SAC?

Go'aan SAC waa xisaabinta unugyada SAC ee loo qoondeeyey hanta kasta. atiijad—ama go'aan—waa mugga ugu badan suurogala (ma aha isticmaalka dhabta ah) ee hanta kasta u baahan tahay.

Dhammaan hantida guryaha waxay leeyihiin qoondayn unug SAC isku mid ah oo ah 1 SAC unug guri.

Hantida wershadaha, ganacsiga iyo ururada waxay u baahan yihiin “go'aan” qaddar mug biyo la isticmaalay ee looga bahaan yahay goobta.

Miyaan U-baahnahay Go'aan?

Hantida kasta ee wershadaha, ganacsiga iyo ururada eek u xiran habka biyaha wasaqda marka ugu horraysa—ama ganacsiyada isticmaala isbedelo ama la beddelay—waxay u baahan go'aan SAC.

Dawladda hoose (meesha hantidu ku taal) ayaa dhamayn kara go'aanada, ama MCES ayaa dhamayn karta marka laga codsado.

MCES ayaa dhamaysa dhammaan go'aanada wershadaha.

Wax Kale ee Go'aanada

Si looga dalbado go'aanh MCES, gudbi Dalabka Go'aanka SAC (oo laga helo Websaydka: metrocouncil.org/Wastewater-Water/Funding-Finance/Rates-Charges/Sewer-Availability-Charge.aspx) iyo waxyaabaha ku taxan foomka gudbinta. Go'aanada qaar ayaa baahda qorshe sagaxadeed oo dheeraad ah iyo dalab.

Waxay caadiyan qaadataa hal illaa laba toddobaad dhamaystirka dalabka marka la helo dhammaan waraaqaha.

SAC waxa markaas bixiya dawladaada hoose, badiya ka qayb ahaan ruqsadda ama liisanka ganacsiga.